



Maalin Qoraxi soo baxdo waxaa ugu khayr badan Maalinta Jimcaha

Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey in Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: "Maalin Qoraxi soo baxdo waxaa ugu khayr badan Maalinta Jimcaha, iyadaa Aadam la abuuray, iyadaana Janada la geliyey, iyadaana laga soo saaray, Qiyaamuhuna dhicimaayo Maalin aan Jimce ahayn".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay in Maalin Qoraxi soo baxdo Maalinta Jimcuhu ugu khayr badan yahay. Sifooyinkiisa waxaa ka mida: inuu Ilaahay abuuray Nabi Aadam-nabadi korkiisa ha ahaatee-, isla jimcahana janada la galiyey, jimcena laga saaray oo dhulka loo soo dajiyey, qiyaamuhuna ma dhacayo maalin aan Jimce ahayn.

<https://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/3711>

